

Dhulweynaha shiinaha arayda somaliyeed, ganacsatada somaliyeed iyo xiriirkii umadaha somalida iyo shinayska waqtii fog iyo mid dhow.

WAXBARASHADA ARDADA SOMALIDA EE DALKA SHIINAHA

Burburkii dawladeenii waxaa la burburay dhamaan adeegyadii bulshada. waxaa kamida meelaha dhaawucu garay waxbarashada dalka .waxaana gaaray dhawac ayasan ilaa hada sidiilarabay iyo si udhow uga soo kabsan ururo iyo dad sigaara isku xilqaamay danagaarana mideeyeen ayaa melabaden oo dalka kamida kabiliaabay inay soo celiyaan waxbarashadii aasaasiga ahayd wax lalaraftaba waxaa meela badan looga guulaystay in sanadobadan kadib ay dugsiyada sare kasoo baxaan arday farabadan lakiin dalkii kuma oolin jamacado ama hadayjireena madaboolikarin takhakhusaadka ardadu ubaahantahay. xiligaas waxaa bilowday ardadii walidkood kabixin karay jamacado dalka dibadiisaa inloo boxo ayadoo faa iidada laga dhaxlay arinkaasi uu ahaa mid waxbadan kabaden khasaarahay kayimi . Dalalka lagu hormaray waxay ahayeen dalalka carabta, lakiin sanadihiin udanbeeyay waxaa bilaamay dalal naga fog, sida dalka dhulweynaha shiinaha ardada somaliyed waxay kala kulmeen dalka shiinaha shacab iyo dawladba soodhaweyn wanaagsan ayadoo dadkaani yihiin dad dhaqan wanaagsan waxay kabarteen maadooyinkii ay rabeen ee ay kawaayen dalka ama dalalka noo dhow, madooyinka ay kabartaan waxaa kamida:

A.Bachelor degree:

- 1.Medicine 2.Telemunication Engineering 3.Mechanical Engineering4.International Economics and Trade**
- 5.Computer Science & Technology 6.Electronics Engineering 7.Chemical Engineering and Technology**
- 8.Mechanical Design and Manufacturing and Automation 9.Aeronautical Engineering**
- 10.Electrical Engineering and Automation.11.Civil Engineering 12.Petroleum Engineering 13. chinese language**

B.Master degree

- 1.Mechanical Engineering 2.Enterprises Management3.Computer application4.Machanical Engineering iyo madoyinkale**

hadaan kahadlo caqabada ay lakulmaan ardadu waxaan dhihi karaa ,majiraan ama waa yaryhiin hadaan ardaygu khalad cad la imaan oo uusan jabin sharuuc jamacadeed ama dalka iyo dadkiisa uyaal. Ardada somaliyed waa kuwa lagajecelyahay jamacadaha ay

dhigtaan taasoo ay keentay akhlaaqaadka wanaagsan ee diiniyan aan heysano. waxay taasi sumcad utahay dalka iyo dadka somaliyeed barrina waxay noqon doontaa mid usamaysa dalka saaxiibo badan ayadoo aan dhihi karo ardaykasta ama inta badan waxay udhaqmaan sidi danjir ilaalinaya dalkiisa kana gudbinaya sumcad wanaagsan.ayadoo aan filayo arday kasta oo somaliyed dunida meelkasta hakajoogee inuu arinkaas kubaraarugsanyahay.

Qofka shisheeyaha ah ee aan somaliya tagin ama ha ahaado dalkaad tagtay mid udhashay ama mid sidaadoo kale marti ku ah wuxuu adiga kaa arko ayuu somali kasawiranayaa samaan iyo xumaan. Arinkaa waa mid taxadarkiisa mudan.



GANACSIGA SOMALIDA EE DALKA SHIINAHA:

Dadka somalidu waa umad aan loo tilmaamin meshii daruuri kahoorto markaas .waxayna sahanka ugu horeeya kutagaan meshii rooble ayagoo sidhakhsa iskugu sheega. Dalka shiinuhu dhowr iyo tobankii sanee udanbeysay tariikhda dunida wuxuu ahaa dal ganacsigiisu kor usocdo lagana

helay badeeco karaqiisan dalalkii kalee tartanka kula jiray waxaa kusoo jabay ganacsatadii dunida ayna lasocdaan kuwa somalidu. Ganacsatada somaliyeed waxay ka abuureen hanti wanaagsan allaha usiisiyaadiyee. Ganacsatada somalida waxaa kadhexeya iskaashi aad uwanaagsan waa kuwa aad uga warqaba ardada waxaad arkaysaa mararka qaarkood xaflado aan muhiimad weyn lahayn oo ardada somaliyeed kuqabsanayso jamacadahooda inay safar dheer usoo galaan ujeedkooduna waxa uu yahay sidii ay ardada ugu dhiirigalin lahaayeen waxbarashada iyo in aqoonta dalkii loolalaabto. Ganacsigu waa yoolka koowaad ee dawlada shiinuhu ay kaleedahay dalalka qaarada afrika somaliduna waa ganacsatada ugu badan ee dal afrikaana katimi lakiin nasiib darada jirta taas dawlada shiinuhu uma oga soomaliya sababtuna waa ganacsatada oo aan intooda badani aan wadan Baasaboor Somali ah ee wata basabooro dalalkale. Maleh ganacsatadu eedaas ee waxaa leh ciddii dalkooda burburisay waxaana aaminsanahay hadii dhamaantood ay wadan lahayen Baasaboor Somali ah inay somaliya noqon lahayd dalka ugu horeeya ee aan shiinaha diniciisa laga marin. waxaan usoo jeedinlahaa ninkii Somali ah oo kamaarma baasaboor shisheeye ha iska daayo si abaalkaagu uu unoqdo abaal somaliya ee uusan unoqon abaal kenya ama ethiopia. Abaalkaaga afrikaankale haloo hayo waa xoog doofaar lagu eryay.



xiriirka soo jireenka ah ee kadhexeeya shucuubta somalida iyo shiinayska:


siday taariikhdu wariso waxaa labada umadood kadhexeeyay xiriir qota dheer kaas oo intiisa badan ahaa dhanka ganacsiga waxaan kaxusi karnaa in 1421-1422 uu dhulkena yimid dhulmarenkii islaamka ahaa ee udhashay gobolka yunnaa ee shiinaha magaca :zheng he(郑和) magaca islamka: Haji mohamed shamsudiin. Wadaadkaasi wuxu tagay muqdisho wuxuu soo xiray xiriir wanaagsan wuxuu kasoo noqday soomaaliya asagoo wata hadiyad uu kamidyahay Gari. Garigaas oo kusawiran melkasta oo tariikhda shiinaha lagu uruuriyo ama ay yaalaan sawirada dadkii hore.



1422 Gari somaliya uu kala yimi zheng he

Xornimadii kadib 14December1960 ayaa dawladeena iyo tan shiinuhu kala saxiixdeen heshiisyo dhaxalgal noqday. Soomaaliya waxay kutageertay shiinaha cod muhiim u ahaa oo ayka rabtay fadhiga golaha loo dhanyahay ee Qaramada midoobay. kadib labada dowladood waxaa dhexmaray xiriir wanaagsan ayagoo casimadaha kala gaareen wafdiyo ay hogaminayeen madaxsare kuwasoo aanu kaxusikarno safar uu beijing kuyimid

AUN maxamed siyaad barre 14/5/ 1972. Shiinuhu Soomaaliya wuxuu udhisay Garoonka kubada cagta ee muqdisho , wadada laamiga ah iyo isbitaal. dawladihii kumeelgaarka ahaa waxaa shinaha yimi AUN Cabdulaahi yuusuf axmed. waxay shina ubaahantahay afrika, Afrika albaabkeeda ayada soo xigana waa soomaaliya laakiin albaabku muda dheerbuu xirnaa wuuna mirirsaday waxaa loobahanyahay in ladayactiro dowladuna xiriir wanaagsan ee lajaan qaadikara wacyiga ay latimaado shinaha iyo dunida danuhu nooga kalaxiranyhihiinba ay meelkasta geysso ciddii kuhaboon aana lagu geyn reer hebel maqanacsanee safiir dalkaasa halasiyo ee halagu diro ninkii dal loodirayo muxuu dalkaas nooga soo qabankaraa, aqoon intee le'eg ayuuse uleeyahay dalkaas. macaa hadaan dawladnimadena Qoondadii qabiilku wali kagudbin reerkaas dhexdiisa halaga raadsho nin howsha qaban kara. Majecleyn inaan hadal siyasadeed kusoo khatimo mana ihi siyaasi arday maskiinaan ahay lakiin waxaan jeclahay dalkeyga rajadayduna waa inaan arko asagoo hormaray. insha allah waan arkin.




Muqdisho 4/2/1964R.W abdirashid ali sharmake iyo R/W:SHINAHA:zhou en Iai



Beijing 14/5/1972 maxamed siyad iyo wasirka arimaha dibada china jipengfei



Great wall 15/1972 maxamed siyaad iyo jipengfei



Beijing 6/8/2008



FG: waxan katagay arima badan anoo sookoobaya warbixinta, hadaad ku aragto wax aan sax ahayn waad isixi kartaa:

waad mahadsantihiin:

W/Q: Dr maxamed abdiraxmaan ismaciil
xaniin64@hotmail.com
ismacil114@gmail.com